Sida Qaybta CVJU kuu Caawin

Qaybta Caddaaladda Dhibbanaha Fal Dambiyeed (CVJU) ayaa dhibbaneyaasha u caawin karta qaababka soo socda:

- Bixinta macluumaadka ku saabsan xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed iyo sida loogu doodo naftaada.
- Bixinta tixraacyada khayraadka iyo kaalmada maxalliga ah.
- Sharraxida sida loo helo macluumaadka kiiska ama siinta macluumaad dheeraad ah xirfadleyaasha caddaaladda fal dambiyeedka.
- Isku xirida dhibbanayaasha iyo hay'adda caddaaladda fal dambiyeed ee ku habboon.
- Ka jawaabida su'aalaha ku saabsan habraacyada iyo shaqaynta nidaamka caddaaladda fal dambiyeed ee Minnesota.
- Ka caawinta dhibbaneyaasha si aan rasmi ahayn in loo caddeeyo oo loo xalliyo tabashooyinka.
- U soojeedinta xeeladaha loo isticmaali karo in lagu xalliyo arrimaha shaqaalaha nidaamka caddaaladda fal dambiyeed.
- Baarista cabashooyinka iyo go'aan ka gaarida in xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed lagu xadgudbay iyo in dhibbanaha si xun loola dhaqmay.
- U soo jeedinta talooyin hay'adaha u xilsaaran dhibanaha sixitaanka iyo habaynta cabashada marka cabashadu la caddeeyo.

CVJU ma ahan qaybta u dooda dhibbanaha, balse waa qayb u dooda in si caddaalad iyo xaqsoor leh loola dhaqmo dhibanneyaasha fal dambiyeed iyo in loo hoggaansamo xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed.

CVJU ma lahan awood ay ku ciqaabto ama ku ganaaxdo wakaaladaha ay baarto ama kuma khasbi karto inay u hoggaansamaan wixii talo-bixino ah. Taas beddelkeeda, CVJU ayaa raadisa in isbeddelo fiican la sameeyo iyadoo loo marayo wadashqaynta wakaaldaha.

Qaybta Caddaaladda Dhibbanaha Fal Dambiyeed (CVJU) waxay awood u leedahay inay baarto cabashooyinka xubnaha nidaamka caddaaladda fal dambiyada si kor loogu qaado heerarka la gaari karo ee ugu sarreeya ee kartida, hufnaanta, iyo caddaaladda ee dhibanneyaasha fal dambiyeed. Ficilada CVJU waxaa haga u kala eexasho la'aanta, qarsoodida, iyo ixtiraamida dhammaan dhinacyada.

U Xallinta Cabashada Si Iskaaga ah

Kala duwanaanshaha ra'yiga ama isfaham la'aanta waxaa inta badan la xalliyaa iyadoo waqti la geliyo in la isla hadlo oo la is maqlo/dhageysto. Waa kuwan qaar ka mid ah tallaabooyinka aasaasiga ah ee aad qaadi karto si aad wax uga qabato dhibaatooyinka iyo walaacyada aad ka qabto shakhsi ama wakaalad:

Akhri wax walba oo laguu soo diro

Dib-u-eegis ku samee dokumeentiyada ay ku siiyaan ama kuu soo diraan booliiska, dacwad oogayaasha, saraakiisha asluubta, ama maxkamadda. Haddii aadan fahmin dokumeentiga, la xiriir wakaaladda soo dirtay.

Su'aalo ka keen

Haddii aadan fahmin sababta ay wax u dhaceen, codso sharraxaad. Ha ka cabsan inaad weydiisato xeerarka, siyaasadaha, ama sharciyadda ku habboon.

Hayso diiwaanada

Ku tiirsanaanta wax xusuusashada had iyo jeer ma ahan habka ugu wanaagsan ee warbixin loo keydsado. Meel ku qoro wadasheekeysiyada, codso magacyada iyo jagooyinka dadka aad la hadasho, oo hayso nuqullada waraaqaha la isku diro oo dhan.

Is-diyaari

Kahor inta aadan wicin wakaaladda, dib-u-eegis ku samee dukumeenti kasta oo su'aalaha sii diyaarso. Markaad iimayl dirayso, iimaylkaaga ha koobnaado oo ha qaabaysnaado, adigoo isticmaalaya dhibcooyin lambareed si aad akhrinta u sahasho. Ka fogow lifaaqyada badan. Gudaha wadaxiriiradaada, si cad ugu sheeg su'aalaha aad rabto inaad waydiiso iyo waxa aad rabto.

Noo reeb farriimo

Xusuusnoow in dadku aysan awoodin inay isla markiiba kuu soo jawaabaan. Wixii fariimo cod ah, u dhaaf farriin dhammaystiran oo ku saabsan sababta aad u wacayso ayna wehliso macluumaadkaaga xiriirka iyo waqti fiican oo lagula soo xiriiro. Wixii iimaylo ah, u oggolow dhowr shaqo maalmood si looga soo jawaabo kahor inta aadan dib u soo dirin iimaylkaaga ama aadan ula xiriirin qof kale oo jooga wakaaladda. Xafiiska dacwad oogaha, inta badan way fududahay in lala xiriiro u doodaha dhibbanaha (hadduu mid jiro) halkii aad la xiriiri lahayd qareenka kiiska gacanta ku haya.

Mar habraacyada cabashada ee caadiga ah

Dhibanneyaasha fal dambiyeed ee qaba cabashooyinka waxay haystaan ikhtiyaar ah inay ku tiirsanaadaan hababka cabashada ee caadiga ah. Habka ugu caansan waa in la maro kala saraynta maamul oo aad codsato inaad la hadasho kormeeraha qofka. Intaas waxaa dheer, hay'adaha fulinta sharciga ee jooga Minnesota waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan habraaca cabashada muwaadinka. Maamulada qaarkood, habraacaas waxaa la geliyaa mareegtooda iyo/ama waxay hayn karaan foom caadi ah oo la heli karo. Maamulada kale, ma jiro foom caadi ah, dhibbanuhuna waa inuu si toos ah cabashada ugu gudbiyo madaxa booliiska ama sarkaalka booliska.

Ku tiirsanow CVJU iyo xuquuq u-doodeyaasha maxalliga ah

Shaqaalaha CVJU ayaa weli diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalaha oo ay kugu hagaan sida wax looga qaban karo dhibaato aad ku qabto hay'adda cadaaladda fal dambiyeed ama xirfadlaha. Intaas waxaa dheer, CVJU ayaa ku dhiirigelisa dhibbaneyaasha inay ku tiirsanaadaan u doodaha dhibanaha ee maxalliga ah si ay u bixiyaan macluumaadka ku saabsan kiiska iyo sidoo kale sharraxaadaha ku saabsan geedi-socodka.

Dhibanneyaasha Fal Dambiyeed

Minnesota gudaheeda, dhibanneyaasha fal dambiyeed waxay leeyihiin dhowr xuquuqood oo qaanuuni ah oo ugu horrayn ka bilawdo inay la xiriiraan saraakiisha sharci fulinta. Inta lagu gudajiro dacwad qaadista kiiska fal dambiyeed, iyo kadib xukunka.

Xuquuqaha dhibbanaha ee muhiimka ah waxaa ka mid ah:

- Xaqa inuu ku ogeysiiyo sarkaalka sharci fulinta marka ugu horraysa ee la raadinayo xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed iyo in lagu siiyo macluumaadka ku saabsan khayraadka iyo magdhowga (magdhowga lacageed).
- Xaqa inuu ku ogeysiiyo xeer ilaaliyaha in eedaymaha iyo xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed la gudbiyay.
- Xaqa in laguu sheego ka siideynta dambiilaha xabsiga marka uu jiro fal dembiyeed gacan ka hadal ah iyo xadgudub qoyseed.
- Xaqa in laguu sheego qoddobada heshiiska qirashada ee la soojeediyay kahor inta aan qirashada laga hor samayn maxkamadda.
- Xaqa in la bixiyo bayaanka saamaynta dhibbanaha xilliga go'aanka maxkamadeed ama xilliga la dhagaysanayo xukunka.
- Xaqa in laguu sheego natiijada kiiska.
- Xaqa in laguu sheego xuquuqaha dhibbanaha ee la dabaqi karo xukunka kadib.

Liiska dhammaystiran ee xuquuqaha dhibbanaha fal dambiyeed waxaa laga heli karaa mareegta Xafiiska Barnaamijyada Caddaalada ee Minnesota.

Qaybta Caddaaladda Dhibbanaha Fal Dambiyeed waxay bixisaa geedi-socod loogu talagalay dhibanneyaasha fal dambiyeed si ay su'aalo uga keenaan ficillada wakaaladaha caddaaladda fal dambiyeed iyo adeegga dhibbanaha iyo horumarinta siyaasadda iyo shaqaynta nidaamka si loo hubiyo in dhibanneyaasha fal dambiyeed loola dhaqmo si caddaalad, sharaf, iyo ixtiraam leh.

Si aad u Gudbiso Cabasho

La xiriir CVJU

Dhibbanayaasha fal dambiyeed ee dareema in xuquuqdooda lagu xadgudbay ama si xun loola dhaqmay waxaa lagu dhiirigeliyaa inay CVJU kula soo xiriiraan telefoonka, iimaylka, ama iyagoo u maraya foomka wardoonka ee onlaynka ah ee ku jira bogga mareegta CVJU. Shaqaaluhu waxay diyaar u yihiin inay si cad uga hadlaan arrinta, inay ku haggaan, oo ay kuu soo jeediyaan ikhtiyaarrada, oo ay ka midka yihiin gudbinta cabasho haddii arrintu ay CVJU awood u leedahay inay wax ka qabato.

CVJU waxay awood u leedahay inay baarto cabashooyinka dhibbaneyaasha fal dambiyeed ee ku saabsan ficilada ay qaadeen xubnaha nidaamka caddaaladda fal dambiyeed iyo ururada bixiya adeegyada dhibbaneyaasha. CVJU ma lahan awood ay ku baarto garsooreyaasha ama cabashooyinka ku saabsan isticmaalka awooda xad-dhaafka ah ee fulinta sharciga.

Buuxi foomka cabashada

Cabashooyinka CVJU ayaa la soo gudbin karaa iyadoo loo marayo degelka onlaynka ah ee ku jira bogga Mareegta Barnaamijyada Caddaaladda ee Xafiiska Minnesota. Foomamka cabashada ayaa sidoo kale laga heli karaa bogga mareegta CVJU ama iyadoo loo marayo boostada haddii la codsado.

Nala soo xiriir

CRIME VICTIM JUSTICE UNIT
Office of Justice Programs
445 Minnesota Street, Suite 2300
St. Paul, MN 55101-1515

Iimayl: cvju.ojp@state.mn.us

Mareegta OJP: ojp.dps.mn.gov
Ka hel bogga CVJU ee hoosta bogga "Caawinta Dhibanayaasha Fal Dembiyeedyada".

651-201-7310
888-622-8799

12-22

Qaybta Caddaaladda Dhibbanaha Fal Dambiyeed

Office of Justice Programs
Minnesota Department of Public Safety